

# BADBAADADA

## Sunta Kaarboon Monogsaydh (Carbon Monoxide) Waa Loo Dhiman Karaa



Ma arkaysid mana urin kartid sunta kaarboon monogsaydh, balse marka cabbirkeedu badan yahay waxaa ay qof ku dili kartaa daqiiqado gudahooda. kaarboon monogsaydh (CO) waxaa ay ka sameysantaa mar kasta shidaal la shido sida gaaska, saliidda,

kerosiinka, qoryaha, ama dhuxusha iyadoo ay hawada ku yar tahay. Haddii qalabka shidaalka gubaya la dayactiro oo si fiican loo isticmaalo, tirada CO ee sameysanta caadi ahaan ma aha mid khatar keenaysa. Hase ahaatee, haddii qalabka aysan si fiican u shaqeynin ama si qalad ah loo isticmaalo, waxaa ka dhasha khatar heer sare ah ee CO. Boqolaal qof ayaa shil ahaan sanad kasta ku dhinta suntan CO taasoo ay keentay qalabka guba shidaalka oo si qalad ah loo isticmaalo ama haleysan.

Kala ogow calaamada sunta CO:

**Madax xanuun, daal, dawaqad, daciifnimo, jahawareer iyo lablabo**


Calaamadahan badankooda ayaa la mid ah kuwa hargabka, cuntada lagu sumoobo, ama cudurro kale.

Haddii aad isku aragtid calaamadahan ee aad filaysid in ay keentay suntan CO-ga:

- Si dhakhsiyo leh hawo u qaado. Albaabada iyo daaqadaha wada fur, xidh qalabka shidaalka guba gurigana isaga bax.
- Waxaad tagtaa gargaarka degdegga ah waxaadna dhakhtarka u sheegtaa in aad ka shaki qabtid in aad ku sumoowday CO.

Haddii ay dhacday in aad ku sumowday CO, waxaa lagu ogaan karaa dhiig oo lagaa qaado islamarka ay sunta ku soo gaarto.

*Macluumaadka ah "Ka badbaada adiga iyo qoyskaaga Sunta Kaarboon Monogsaydh", ayaaad EPA ka helaysaa kuwaasoo ku qoran Spanish, Vietnamese, Chinese iyo Korean. Tayada Hawada Gudaha booqo [www.epa.gov](http://www.epa.gov) ama waxaad wacdaa 800-438-4318.*



**Asalka iyo Tilmaamaha Dhibaataada Kaarboon Monogsaydhka (CO)**